



Dhaqtar. Devon Q. Horton, *Kormeeraha guud*

Mudane Dijion DaCosta, Sr., *Guddoona Guddiga*
Marwo Deirdre P. Pierce, *Guddoomiye Ku xigeen*
Marwo Anna Hill
Marwo Whitney McGinniss
Marwo Allyson Gevertz
Marwo Vickie B. Turner
Dhaqtar Joyce Morley

WIXII FASAXID DEGDEG AH

Oktoobar 8, 2024

Xiriirka:

Donald Porter, <i>Ed.D.</i>	678-481-4110
Carla Parker	404-734-1717

Heerarka Qalinjabinta DCSD waxay u Sare kacdaa Heer sare Marwalba

Sideed ka mid ah Tobanka Kooxa hoosaadka ee Ardayda ayaa Muujinayo Guulo Cajiib ah

(STONE MOUNTAIN, GA)—heerka qalinjabinta Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb (*DCSD*) waxay gaartay heer sare marwalba ee gudaha 2024. Heerka qalinjabinta afarta sanno ayaa hadda ah boqolkiiiba 79.1%, illaa 3.3 laga bilaabo 2023 iyo ka badan boqolkiiiba 20.5 laga soo bilaabo 2011, sannadka koowaad xisaabinta kooxda la saxay waxaa looga baahnaa sharciga faderraalka.

Intaas waxaa dheer hormarinta qeybta *Ardaydoo Dhan*, todoba (7) marka laga saaro sagaal (9) heerarka koox hoosaadka ardayda degmada (77.8%) ayaa korodhay sannad dugsiyeedka hore. Waxay matalaan heerarka qalinjabinta ugu sareyso oo dadyowgaan ah inta lagu jiray tobankii sanno ee la soo dhaafay.

<u>Koox hoosaadka</u>	<u>Hormarinta %</u>	<u>Fasalka 2023 v. Fasalka 2024</u>
• Dhammaan Ardayda	Waxaa ku korodhay 3.3	(75.8 illaa 79.1)
• Aasiyaan/Jasiirada Baasifiga	Waxaa ku korodhay 4.8	(80.6 illaa 85.4)
• Madowga	waxaa ku Korodhay 2.6	(77.0 illaa 79.6)
• Hisbaanig	waxaa ku Korodhay 6.5	(60.7 illaa 67.2)
• Cadaadka	Waxaa ku korodhay 2.7	(91.6 illaa 94.3)
• Dhaqaale ahaan Liito	Waxaa ku korodhay 3.7	(73.6 illaa 77.3)
• Bartaha Ingiriiska	Waxaa ku korodhay 5.8	(54.9 illaa 60.7)
• Ardayda Naafada ah	Waxaa ku korodhay 4.7	(62.6 illaa 67.3)

**Sannad dugsiyeedka 2024 wuxuu calaamad u yahay guusha sannadka 7^{aad} ee isku xigga oo Koox hoosaadka Ardayda Naafada ah.*

“Hormarinadaan qalinjabinta ayaa kaliya suurtogal ah u sababtoo ah go'aaminta iyo diirad saarida ardayda, macalimiinta, qoysaska, shaqaalaha taageerada, iyo maamulayaasha ay ka go'antahay inay qabtaan shaqada muhiimka u ah in lagu gaaro guushaan muhiimka ah,” waxaa yiri Kormeeraha guud Dhaqtar Devon Q. Horton. “Guddigeena Waxbarashada ayaa sidoo kale u qalma buundada lagu maalgelinayo illaha xeelada si loo xoojiyo guusha iyo natijjooyinka ardayda, sida guulahaan heerka qalinjabinta cajiibka ah.”

Sideed iyo toban (18) marka laga saaro labaatan iyo shan (25) dugsiyada sare (72%) ayaa kordhiyay heerkooda qalinjabinta afarta sanno. Guulaha laba qeyb ee dugsiga ugu caansan waxay ka dhaceen sadexda (3) dugsiyada sare ee xigga:

• Dugsiga Sare McNair	Waxaa ku kordhay 21.7%	(55.2 illaa 76.9)
• Dugsiga Kale ee DeKalb	Waxaa ku kordhay 13.5%	(15.9 illaa 29.4)
• Dugsiga Sare Columbia	Waxaa ku kordhay 10.7%	(72.0 illaa 82.7)

-WAX BADAN-

SOMALI

Shan (5) dugsiyo ayaa muujiyay guulaha dhibcaha boqolkiiba 6 ama ka sareeyo inta lagu jiray sannad dugsiyedka hore: Dugsiga Sare Clarkston (+8.1), Xarunta Waxbarashada Gaarka ah ee East DeKalb (+7.9), Dugsiga Sare Stephenson (+7.1), Dugsiga Sare Lakeside (+6.6), iyo Dugsiga Sare Cross Keys (+6.0).

Korodhyada heerka qalinjabinta dheeraadka ah waxaa lagu arkay tobanka (10) dugsiyada sare ee xiggo: Dunwoody HS (+4.8), Cedar Grove HS (+4.4), Elizabeth Andrews HS (+3.7), Chamblee HS (+3.4), Tapestry Public Charter (+3.0), Druid Hills HS (+2.7), Redan HS (+2.0), Towers HS (+2.0), Stone Mountain HS (+1.6), Arabia Mountain HS (+0.3),

Dugsiyada sare ee xiggo waxay sii wadeen inay joogteeyaan heerarka qalinjabinta ka sareyo boqolkiiba 95:

- Machadka Kulliyada Hore DeKalb* 100% Sannadka sadexaad isku xigga oo boqolkiiba 100!
 - Dugsiga Sare Arabia Mountain* 98.9%
 - Dugsiga Farshaxanka DeKalb 97.2%
 - Dugsiga Jaatarka Dadweynaha Tapestry* 96.8%
- Dugsiga *Title 1*

"Waxaan sii wadeynaa hirgelinta qaab dhismeedkeena MIRACLES si aan dib ugu qaabeyno oo ugu xoojino dugsiyadeena jawiyo waxbarasho aad ay ugu lugleeyihiin, ardayda xudun u ah," Dhaqtar Horton ayaa yiri. "Halka shey aanan marnaba isbaaleynin waa ka go'naanteena lagu kobcinayo dhaqankeena iyo cimilada, taasoo lagu hubinayo guusha ardaydoo dhan."

Sannadkii la soo dhaafay, mid ka mid ah Mabaadi'da Degmada MIRACLES waxay hormarinayeen Qaab Kormeerida Kooxda Qalinjabinta nidaamkoo dhan ah. Habraacyadaan howlgalka heerkaan waxaa si buuxdo loogu dhafay dugsiyada sare ee Horizon intii lagu jiray sannad dugsiyedka 2023-24 oo waxaa kormeera shaqaalaha Area Horizon ee heerka degmada. IntaaS waxaa dheer, degmada waxay dib u qaabeysay oo ay kireysteen shaqaale ay ka go'antahay ee kordhiyo taageerada dhammaan dugsiyada sare oo DCSD oo dhan.

Sannadkaan, habkaan kormeerida kooxda qalinjabinta ayaa lagu balaariyay dhammaan dugsiyada sare sida nidaamkoo dhan. Dhowr Mabaad'i oo MIRACLES ayaa loo bilaabay inay taageerto guulaha heerka heerka qalinjabinta mustaqbalka:

- Jooji isku xirka illaa Dib isugu xirka: Hindisaha dib u howlgelinta waxbarashada fasalka ee xadeynayo gelitaanka mobeelka inta lagu jiro maalinta dugsiga.
- Machadyada Dadajinta: Hindisaha ka bixida dugsiga oo dib uga qeybgelinayo ardayda raadinayo inay kasbadaan dibloomadooda dugsiga sare.
- Chancelight: Waxay taageeraan ardayda dugsiga dhexe ee da'da weyn si ay u dadajiso u gudubkooda dugsiga sare.
- Dugsiga sare-Kadib P.U.S.H. Qorshaha: Qorshaha lagu **Diyaariyo**, **Sare** loogu qaado, iyo **Lagu** taageero ardayda **Guud** ahaan fasalada 6-12 markay u gudbayaan dugsiga sare oo ay qalinjabinayaan oo ay u diyaar garaobaan inay gaaraan yoolalkooda dugsiga sare ka dib.
- Hormari Muhiimada Waxbarashada: Isku dabarid qaabka farbarashada cadeynta ku saleysan si ay u taageerto ardayda naafada ah ee ku jiro dugsiyadeena qaar ee Horizon.
- Qorshooyinka Luuqada Waxbarashada oo Bartayaasha Ingiriiska: qorshooyinka ardayga gaarka u ah inay kordhiyaan xirfadaha barashada luuqada Ingiriiska ee bartayaasha Ingiriiska la aqoonsaday.

XXX